

Ku soo dhowow adigaaga rakaabka ahi Iswidhan

Warqaddan waxaad ka helaysaa warbixin ku saabsan dhowr ka mid ah qawaaniinta aasaasiga ah ee gaadiidka Iswidhan.



Suunka baabuurka

Waddanka Iswiidhan waxa sharci ah in la isticmaalo suunka. Meel kastoo aad ka fadhiisanayso baabuurka yar ama gawaarida xamuulkaba waxaad isticmaalaysaa suunka baabuurka. Looma ogola in ay raacaan baabuurka dad kabadan intii loogu talagaly. Waa wadaha baabuurka wada kan eegaya in dhammaan dadka ay da'doodu ka yar tahay 15 sano ay suunka xidhan yihiin. Haddii aad raacaysa bas suunka leh waad isticmaalaysaa.

Ilmaha baabuurka ku jira

Carruurta dhererkoodu ka gaaban tahay 135 sentimitir waxay isticmaalayaan kuraasta badbaadada ee gaarka ah marka ay raacayaan baabuurka. Waxay noqon kartaa kursiga badbaadada ilmaha yar (babyskydd), kursiga carruurta ee baabuurka (bilbarnstol), kursiga suunka leh (bältestol) ama barkimada suunka leh (bälteskudde), waxaana la waafajinayaa dhererka ilmaha. Qalabyadaas badbaadada ah waxaa loo adeegsnayaa halkii loo isticmaali lahaa suunka baabuurka ama waxaa lala isticmaalayaa suunka baabuurka, waxaana la rakibayaa iyada oo la raacayo qoraalka tilmaan-bixinta. Carruurta marnaba looma oggola in lagu fadhiisiyo meel leh barkimada shilka (krockkudde) oo shaqaynaya.

Koofiyadda baaskiilka

Waddanka Iswiidhan waxa sharci ah in dhammaan carruurta da'doodu ay ka yar tahay 15 sano ay isticmaalaan koofiyadda baaskiilka marka ay baaskiilka wadaan. Qaannunku wuu jirayaa iyada oo aan loo eegayn haddii ilmaha naf'haantiisu uu baaskiil wado ama lagu riixayo baaskiilka ama uu ku jiro buudhiga baaskiilku jiito ee (cykelkärra). Haddii adigu aad ilmo baaskiil ku riixayso, kolkaa adiga ayaa ka mas'uul ah in ilmuhu uu xidhan yahay koofiyadda baaskiilka.

Xawliga

Xawliga Iswiidhan waxa jira heerka xawliga la oggolyahay oo u dhaxeeya 30km/saacaddiiba ilaa 120km/saacaddiiba. Jidad badan baa waxaa yaalla kamarado oo gaadiidka socda xusuusinaya in aan la dhaafi karin xawliga la oggolyahay. Haddii adoo xoog u socda uu booliisku ku joojiyo lacag khasiraad ah ayaad bixinaysaa. Weliba waxa kale oo aad waayi kartaa oo lagaa qaadayaa warqaddaada wadista baabuurta.

Ka caaganaanta cabbida khamriga

Qawaaniin adag ayaa ka taalla Iswiidhan marka laga hadlayo khamriga daroogada iyo wadista gaadiidka. Xadka Iswiidhan la oggolyahay in qofku isaga oo khamraysan in uu gaadiidka wadaa waa 0,2 kunkiiba. Haddii iyada oo in ka badan 0,2 kunkiiba oo khamriya ay dhiiggaga ku jirto uu booliis ku qabto waxaad bixinaysaa lacag khasiraad ah, waxaana lagaa qaadayaa warqadda wadista baabuurka ama xabsi ayaad galeysaa. Booliisku xaq ayuu u leeyahay in

uu tijaabo idinka qaado haddii aad khamri soo cabtay, xitaa tijaabo ayaa lagaa qaadayaa iyada oo aanay jirin sobob lagaaga shikiyo in khamri aad soo cabtay.

Gaadiid lahaansho

Waa in aad ku jirtaa caymiska gaadiidka haddii aad leedahay dhug-dhugleyda fudud, baabuur, dhugdugleyda weyn, gaariga xamuulka ama bas, kuwaas oo gaadiid ahaan loo isticmaalayo. Waxa kale oo weliba aad bixinaysaa cashuurta gaadiidka. Haddii aad leedahay gaadiid wuxuu xil kaa saaran yahay in aad ka soo kantaroosho Hey'adda Iswidhishka ee tijaabinta baabuurta ee (Svenska Bilprovning). Marka aad iibsanyso ama aad iibinayso gaadiid waxaad ogeysiinaysaa Hey'adda waddooyinka (Transportstyrelsen). Haddii aad iibsanyso baabuur oo aanad lahayn lambarka shakhsiga iswiidhishka (personnummer) waxaad Hey'adda waddooyinka ka codsan kartaa lambarrada ku meelgaadhka ah ee loo yaqaan (samordningsnummer).

Taayirrada

Laga bilaabo 1da bisha diisambar ilaa 31ka bisha maaris waa in aad isticmaashaa taayirrada barafka haddii ay tahay silbasha ama baraf. Taayirrada barafku waxay noqon karaan kuwo gu' iyo jiilaalba la isticmaali karo (dubbade) ama kuwo xilli uun la adeegsan karo (odubbade). Haddii aad haysato kuwo labada xilli la isticmaalo waxaad isticmaali kartaa laga bilaabo 1da bisha oktoober ilaa 30 bisha abril, ama ilaa inta uu waddada baraf jiro.

Laydhka gaaban

Markaad baabuur Iswiidhan ku dhex waddo waa in had iyo jeer uu laydhka gaabani shidnaadaa, xitaa maalinimadii.

Warqadda wadista gaadiidka/Laysin

Si warqadda wadista baabuurta aad ugu hesho Iswiidhan waxa loo baahan yahay in aad ka gudubto imtixaanka wadista baabuurka. Imtixaanka wadista baabuurku wuxu ka kooban yahay laba qaybood, qayb ah imtixaanka aqoonta iyo imtixaanka wadista. Haddii aad jabisid qawaaniinta gaadiidka ee Iswiidhan waxaa lagaa qaadayaa laysin/warqada baabuur wadista xataa hadii laysinkaa-gu/warqadaada baabuur wadista ay tahay mid aa ka qaadatay waddan kale oo aan Iwiidhan ahayn tusaale ahaan sida kuwaan hoos ku qoran.

** Belgien, Bulgarien, Cypern, Danmark, Frankrike, Finland, Grekland, Irland, Island, Italien, Liechtenstein, Luxemburg, Nederländerna, Norge, Portugal, Spanien, Storbritannien, Tyskland, Österrike, Cypern, Estland, Lettland, Litauen, Malta, Polen, Slovakien, Slovenien, Tjeckien och Ungern.*

Qawaaniinta gaadiidka

Haddii aad jebiso qawaaniinta ka jira Iswiidhan, markaa waxaad bixinaysaa lacag ganaax ah. Warbixin ku saabsan dhowr ka mid ah qawaaniinta gaadiidka ee



ka jira waddanka Iswiidhan ayaad ka helaysaa bogga Internet ee Hey'adda waddooyinka (Transportstyrelsen) ee www.transportstyrelsen.se.

Ma haysataa su'aalo?

Haddii aad haysato su'aalo waxaad waci kartaa Adeegga macaamiisha waaxda socdaalka ama Adeegga macaamiisha hey'adda gaadiidka. Waxay ka jawaabayaan su'aalaha lagu weydiiyo afka iswiidhishka iyo af ingiriiska.

Haddii aad hayso su'aalo kale waxaad waci kartaa xidhiidhka telefoonada ee Hey'adda waddooyinka. Lambarka telefoonka ee Trafikverket, 0771-921 921 ama telefoonka dhexe ee hey'adda gaadiidka Transportstyrelsen, 0771-503 503.

Adeegga macaamiisha waaxda socdaalka Trafikverket Wixii su'aalo ku saabsan jidadka iyo socdaalka la xiriir 0771-24 24 24
Iyo su'aalaha ku saabsan warqadda ogolaashaha wadida gaadiidka la xiriir 0771-17 18 19.

Adeegga macaamiisha hey'adda gaadiidka Transportstyrelsen
Haddii aad haysato su'aalo ku saabsan gaadiidka, waxaad waci kartaa 0771-14 15 16.

Haddii aad haysato su'aalo ku saabsan warqadda wadista gaadiidka waxaad waci kartaa 0771-81 81 81.



TRAFIKVERKET
SWEDISH TRANSPORT ADMINISTRATION

Swedish Transport Administration, SE-781 89 Borlänge, Sweden
Visiting address: 1, Röda vägen, Phone : 0771-921 921.

www.trafikverket.se